



# Waxbarashada Ingiriiska

ee milicsiga

	Da'da	Qiimeynta ama Sha-haadada
<b>Dugsiga hoose</b>		
Sannadka Hore	Xanaanada	3-4
	Soo dhaweynta	4-5
Heerka Muhiimka 1	Sannadka 1	5-6
	Sannadka 2	6-7
	Sannadka 3	7-8
Heerka Muhiimka 2	Sannadka 4	8-9
	Sannadka 5	9-10
	Sannadka 6	10-11
<b>Dugsiga sare</b>		
Heerka Muhiimka 3	Sannadka 7	Imtixaanka dugsiganadka oo dhan ah
	Sannadka 8	
	Sannadka 9	
Heerka Muhiimka 4	Sannadka 10	GCSE (General Certificate of Education)
	Sannadka 11	
<b>Kulliyada/Fasalka Lixaad*</b>		
Sannadka 12	16-17	Heerarka-A, Heerarka-AS, heerarka aasaaska NVQs, koorsooyinka shaqada, BTECs, tabaradas
Sannadka 13	17-18	
<b>Waxbarashada Sare</b>		
Jaamacada	18+	Bajala, MasterPhD

\*lyada oo ardayda qaarkood ay joogteynayaan dugsigooda sare si markaas loo dhameystiro sannadaha 12 iyo 13, ardayda sidoo kale waxay leeyihiin dooqyada looga qeybgalayo kulliyada.

# Qiimeynta iyo Shahaadooyinka

**SATs** Sidoo kale waxaa loo yaqaan sida imtixaanada manhajka qaranka' 11-sanno jir oo Ingiriiska oo dhan u fariistaan imtixaanada xisaabaha iyo af Ingiriiska. SATs waxaa loo isticmaalaa in lagu cabiro heerka canugaaga uu baranayo. Waxay sidoo kale cabiraan guusha barida ee dugsiga canugaaga.

**GCSE** Ardayda waxay doorataa shan maadooyin, ee la barto labo sanno inta u dhaxeeyso da'da 14 illaa 16. Kadib marka ay gudbaan imtixaanada taxanaha, ardayda waxaa lagu abaalmariyaa GCSE (Shahaadada Guud ee Dugsiga Sare) ee maado walbo.

**Heerar-Heerarka-AS** Heerarka-A waa shahaadada ugu caansan ee la dabagalo jaamacada ka hor oo waxaa lagu heli karaa maadooyin kala duwan. Ardayda inta badan waxay bartaan inta lagu jiro Sannadka 12 iyo 13 ee dugsigooda sare (Galaas Lixaad) ama kulliyad. Waxay sidoo kale heli karaan shahaadada heerka-AS dhammaadka sannadka 12 haddii ay doortaan inay bartaan maadada oo hal sanno kaliya. Ardayda waa inay buuxiyaan 3 ama 4 Heerarka-A si markaas looga ogolaado jaamacada; fasalada loo baahanyahay waxay ku xiranyihiin jaamacada iyo koorsada aad codsanaysid.

**BTEC** (Gollaha Waxbarashada Ganacsiga iyo Cilmiga farsamada) shahaadooyinka waxay aad u waafaqsanyihiin shaqada mustaqbalka ardayga ama qorshooyinka xirfada, oo isu geysaa barashada fasalka iyo dhaqanka, shaqada la xiriirto hormarinta xirfadaha. Way la dhinac baran karaan ama sida badelka GCSEs. Ardayda waxay sidoo kale baran karaan BTECs badelkii Heerarka-A; waxay weli helayaan shahaado u dhiganto ee laga ogolaaday jaamacadaha ugu badan.

**Tababarada Iyo NVQs** Shahaadada Xurfada Qaranka (NVQs) waxaa dabagali karaa kuwa doortay inay qaataan tababarka (shaqada lacagta la bixiyo ama aan la bixin taas oo ku qalabeyso ardayda cilbiga gacanta iyo waaya aragnimnada shaqada). NVQs waxaa lagu abaalmariyaa sida ku saleysan xiliga kartida qofka ee loogu sameynayo shaqadooda si wax ku ool ah. Ardayda barataa NVQ ee u dhiganta Heerka-A waxay quseyn kartaa jaamacada.

# Isbadalada hadeer

ee waxbarashada Ingiriiska

## Waxbarashada Dugsiga hoose

Sannadaha hadeer, isbadalada ugu weyn waxaa loo sameeyay qaabka carruurta loo qiimeeyay inta lagu jiray waqtigooda ee dugsiga hoose. Halkaas oo ardayda ay ku isticmaasho in loo kooxeeyo heerarka ku saleysan waxqabadka imtixaamada, heerarkan waxaa ka saaray dowlada. Hadeer, dugsiyada waxay go'aansadaan waadooyinkooda gaarka ah ee lagu qiimeynayo hormarka ardayda. Gaar ahaan, isbadelkaan wuxuu leeyahay saameynta qiimeynta macalinka iyo natiijooyinka SATs.

**Isbadelada Qiimeynada Macalinka (TAs)** Ardayda waxaa lala ekeynsiinayaa 'ardayda way awoodaan' bayaanada badelkii heerarka. Kuwaan waa sharaxaadaha waxa carruurta laga filanayo inay usuurto-gasho inay sameeyaan waqtiga imtixaanka. Waa dhinaca Qiimeynada Macalinka ee dugsiyada ay arki karaan haddii ardaydooda ay usuurto-galeyso inay gaaraan heerarka laga filanayo.

**Isbadelada qiimeynada SATs** Natiijooyinka SATs waxaa loo isticmaalaa in loo siiyo sida heerarka manhajka qaranka. Hadeer, sikastaba, ardayda waxaa la siinayaa buundo baaxadeysan, intaa waxaa dheer buundada ceeriinka ah—tirada dhabta ah ee buundooyinka ay heleen. Ka bilow Luuliyo 2016 illaa horida, marka Sannadka 6 natiijooyinka SATs la daabaco ardayda waxaa la siinayaa:

- Buundadooda ceeriinka ah
- Buundada la baaxadeeyay
- Xaqiijinta haddii ay gaareen ama aysan gaarin isku celceliska qaranka ee 100

